Dugsiyada Dadweynaha ee Boston waxa ka go'an in dhammaan ardaydayadu — oo ay ku jiraan kuwa aan weli si fiican u baran Ingiriisiga — helaan waxbarashada ugu fiican ee la suurta-galin karo.

Sharci ahaan, dhammaan Bartayaalka Luqadda Ingiriisiga ee gaaray da'da dugsiga waxay u-qalmaan taageero Barashada Ingiriisiga oo Luqad Labaad ahaan (ESL) si looga caawiyo inay noqdaan ku-hadlayaal fiican ee Afka Ingiriisiga. Barnaamijyada u adeegga ardayda ay yar tahay aqoontooda Ingiriisiga waa in lagu saleeyaa cilmi waxbarsho oo sugan oo waa in lagu hirgaliyaa shaqaale tababaran iyo qalab, oo waa inay noqdaan kuwa waxtar ah si ay ardayda uga caawiyaan inay bartaan Af Ingiriisiga.

Si loo fuliyo shuruudahaas oo loo bixiyo waxbarasho tayo leh oo ay helaan dhammaan ardayda barata Ingiriisiga, ayaa Xafiiska Bartayaalka Luqadda Ingiriisigu uu ku sameynayaa barnaamijyada Dugsiyada Dadweynaha ee Boston ee loogu tala galay bartayaalka luqadda Ingiriisiga haggaajin weyn oo degdeg ah.

Sidee baannu u adkeyneynaa barnaamijyada loogu tala galay bartayaalka luqadda Ingiriisiga?

- Waxaannu kordhinay mugga barnaamijyada loogu tala galay bartayaalka luqadda Ingiriiska (ELLs) oo qura.
- Waxaannu ku dadaaleynaa sidii aannu dugsiyada uga sameyn laheyn barnaamijyo SEI kuwaas oo ku dhow xaafahada ay ardaydu ku nool yihiin.
- Wxaannu beddelnay xeerarkii ku-qoridda iskoolka ee ardayda "ELL"ka ah. Laga bilaabo Janaayo 2010, dhammaan bartayaalka luqadda Ingiriiska waxa la siin doonaa barnaamijyo SEI ah iyo adeegyo horumar luqaddeed oo garaantii ah.
- Waxaannu diyaarineynaa macalimiin badan oo si karti leh wax u bara bartayaalkeynna luqadda Ingiriiska.
- Waxaannu soocnay oo aannu iibineynaa qalab haboon oo aanu si fiican ugu adeegi karno bartayaalka luqadda Ingiriiska.
- Waxaannu furnay Akadamiyadda Ardayda Cusub si ay ugu adeegto bartayaalka luqadda Ingiriiska ee gaaray da'da dugsiga sare ee dhawaan yimi, oo waxaannu baddinay imtixaanka luqadda iyo la-talinta xagga doorashada dugsiyada ee Xarunta Imtixaamidda iyo La-Talinta Ardayda Cusub.
- Waxaannu u shaqeyn doonnaa inaannu abuurno oo aannu sii-wadno bii'ad dugsi oo soo-dhoweeyn leh ee bartayaalka luqadda Ingiriiska.

Waa maxay Waxbarshada Ingiriisiga ee Taageersan "Sheltered English Instruction"?

Waxbarashada Ingiriisiga ee Taageersani (SEI) waxay bartayaalka luqadda Ingiriisiga siisaa taageeroonyinka ugu xoogga badan. **Ardayda loo aqoonsaday inay yi-hiin bartayaalka luqadda Ingiriisiga waa inay si xoog leh u tixgaliyaan inay galaan barnaamij ah Warbar-shada Ingiriiska ee Taageersan (SEI).**

Dhamman fasallada "SEI"ga ah, waxay ardaydu ku bartaan Barashada Ingiriisiga Luqad Labaad ahaan (ESL) iyo waliba maaddooyinka xisaabta, sayniska, taariikh/cilmiga bulshada, akhriska iyo qoraalka. Koorsooyinka iyo buugta iyo qalabka waxa si gaar ah loogu habeeyey bartayaalka luqadda Ingiriiska si ay waxyaalahaasi u kaafiyaan tiirarka manhajka dawladda.

Waxa jira laba nooc oo ah barnaamijyada luqadda ee SEI ah:

Barnaamijyada Luqaddeed ee Gaarka ah ee "SEI"ga ah

ee loogu tala galay ardayda luqadda guryahoodu yihiin Spanish, Haitian, Cape Verdean, Shiine amase Vietnamese

- Dhammaan aradyda ku jirta barnaamijkan waxay ku hadlaan luqad isku mid ah.
- Waxay ardayda iyo qoysaskoodu heli doonaan shaqaale laba-luqadle/laba-dhaqanle ah ee barnaamijyadaa Luqadeed ee Cayiman.
- Fasallada waxa lagu bixin doonaa Barashada Ingiriisiga Luqad Labaad ahaan (ESL).
- Koorsooyinka waxa si gaar ah loogu habeeyey oo loogu bixin doonaa barasho maaddo iyo luqadda Ingiriisiga ee ku saleysan Qaabka Manhajka Massachusetts.
- Waxa la isticmaali doonaa qalab taageera luqadda Ingiriisiga iyo horumarinta maaddooyinka ee ardayda "ELL"ka ah.

Barnaamijyada "SEI"ga ah

ee loogu tala galay ardayda ku hadasha luqado kala duwan

- Dhammaan ardayda dhigata barnaamijyadan waxay ku hadlaan luqado kala duwan.
- Fasalada waxa lagu bixiyaa Barashada Ingiriisiga Luqad Labaad ahaan (ESL).
- Koorsooyinka waxa si gaar ah loogu habeeyey oo loogu bixin doonaa barasho maaddo iyo luqadda Ingiriisiga ee ku saleysan Qaabka Manhajka Massachusetts.
- Waxa la isticmaali doonaa qalab taageera luqadda Ingiriisiga iyo horumarinta maaddooyinka ee ardayda "ELL"ka ah.

Maxaa dhici doona haddii aanan ilamheyga u dooran barnaamij ah bartayaalka luqadda Ingiriiska?

Annagu waxaannu rumeysan nahay in barnaamijka Warbarshada Ingiriiska ee Taageersan (SEI) uu yahay doorashda ugu fiican ee bartayaalka luqadda Ingiriisiga ee marka ay diyaar noqdaan, si guul ah, ugu gudbin kara fasalada waxbarshada guud ee wax lagu dhigo luqadda Ingiriisiga oo qura (general education, English only).

Ardayda "ELL" ka ah ee dooratay barnaamij waxbarasho ee guud waxay sii heli doonaan adeegyada horumarinta luqadda Ingiriisiga. Xafiiska Bartayaalka Luqadda Ingiriisigu wuxuu sii wadi doonaa inuu ku taliyo barnaamijyo luqadeed oo loogu tala-galay qoysaska ardayda "ELL"ka ah ee wax hor-u-socod ah ka muujin-waaya xagga waxbarashada guud.

Halkee bay caawimo u raadsan karaan ardayda ah bartayaalka luqadda Ingiriiska iyo qoysaskoodu?

- Shaqaalaha Xarumahaa Kheyraadka Qoyska (FRC) ayaa leh tababar ay ku caawiyaan in qoysasku gaaraan go'aanno macluumeysan.
- Xarunta Imtixaamidda iyo La-Talinta Ardayda Cusub ee Dugsiyada Dadweynaha ee Boston ayaa bixisa taageero iyo la-talin qof qof ahaan ah.



Xarunta Imtixaamidda iyo La-Talinta Ardayda Cusub

Madison Park Complex
55-75 Malcolm X Blvd.
✆617-635-1565 ▪ Fax: 617-635-8332
Saacadaha caadiga ah:
Isniin–Jimce: 8:00 galin-hore –5:00 galin-dembe

Xarumaha Kheyraadka Qoyska

Saacadaha caadiga ah xilli sannad dugsiyeedka 2010-2011:
Isniin–Jimce: 8:30 galin-hore –5:00 galin-dembe
Oktoobar 6, Nofambar 3, Disambar 1, Abriil 6, Mey 4 iyo Juun 1: 8:30 galin-hore –1:30 galin-dembe

"ZONE" ka BARI: 1216 Dorchester Ave., Dorchester
✆ 617-635-8015
Taageero xagga luqadaha soo socda: Cape Verdean creole, English, French, Haitian creole, Portuguese, Spanish iyo Vietnamese

"ZONE" ka WAQOOYI: 75 Malcolm X Blvd., Roxbury
✆ 617-635-9010
Taageero xagga luqadaha soo socda: Cantonese, Cape Verdean creole, English, Mandarin, Portuguese iyo Spanish

"ZONE" ka GALBEED: 515 Hyde Park Ave., Roslindale
✆ 617-635-8040
Taageero xagga luqadaha soo socda: Cape Verdean creole, English, French, Haitian creole, Portuguese iyo Spanish

Dugsiyadda Dadweynaha ee Boston
Xafiiska Bartayaalka Luqadda Ingiriisiga
Eileen de los Reyes, Kaaliyaha Kormeeraha Guud
Ku-taalla Dusiga Harbor Middle School
11 Charles Street, Dorchester, MA 02122
✆ 617-635-9435 ▪ Fax: 617.635.8322

Qoraalkan waxa la qoray iyadoo lala kaashaday Xafiiska Qoyska & Hawl-galinta Ardayga ee BPS iyo Xafiiska War-galinta ee BPS

Sebtembar 2010

SOMALI

Farriin Muhim ah ku socota Qoysaska

Bartayaalka Luqadda Ingiriisiga

FOCUS On Children
Boston Public Schools

Carol R. Johnson
Kormeeraha Guud ee Dugsiyada